

W /Maaliyadda XFS iyo wafti uu hogaaminayo ayaa dalka Mozambique uga qayb galay shirkii sanadlaha ahaa ee Bangiga Horumarinta Islaamka 2015-06-13

Wasiirka Maaliyadda Xukuumadda Federaalka Soomaaliya mudane Maxamed Aadan Farkeeti ayaa magaalada Maputo ee dalka Mozambique uga qayb galay shirkii sanadlaha ahaa Bangiga Horumarinta Islaamka, kaas oo ay ka soo qayb galeen in kabadan 56 wadan oo xubnaha ka ah iyo Hay'ada uu leeyahay Maal qabeenka u dhashay Maraykanka Bill Gate.

Wasiirka ayaa shirka ka jeediyey Khudbad dheer oo uga hadlayo horumarka ay Soomaaliya gaartay sanadihii la soo dhaafay iyo sida shacabka Soomaaliyeed ay uga sameeyeen horumarka dhanka Dhaqaalaha, Siyaasada, Arrimaha Bulshada iyo Dib u dhiska dalka.

Wasiirka ayaa sheegay in Bangiga Horumarinta Islaamka uu Soomaaliya ka caawiyo qaybo ay ka mid yihiin Caafimadka iyo Waxbarashada, shirkaana lagu go'aamiyey lacag gaaraysa 500 milyan oo dollar oo loogu deeqay wadamada xubnaha ka ah Bangiga.

"Bangiga Horumarinta Islaamka oo xaruntiisu tahay magaalada Makah ee dalka Sacuudi Carabiya iyo Hay'ada Samafalka ee Gate Foundation ayaa isku raacay in la bixiyo lacag gaaraysa 500 Milyan oo dollar oo lagula dagaalamayo Fakhriga iyo Cudurada wadamada xubnaha ka ah Bangiga Horumarinta Islaamka, Sanduuqaan oo ay si wada jir ah isaga kaashanayaan Bangiga iyo Hay'ada Bill Gate Foundation ayaa looga gol leeyahay in wax looga qabto saboolnimada iyo cudurada, laguna abuurto barnaamijyo lagu taageerayo Caafimaadka, Beeraha iyo kor u qaadida nololsha dadka reer miyiga ah" ayuu yiri Wasiir Fargeeti.

Sidoo kale, Madaxweynaha Bangiga Horumarinta Islaamka oo kulan la qaatay Wasiirka Maaliyadda Soomaaliya ayaa soo dhaweyay hormarka ay sameesay Somalia balan qadayna in uu garab istaagi doono umadda Somaliyeed sidii ay uga caawin lahaayeen dhanka Horumarka beeraha iyo kor u qaadida heerka waxbarasho ee dalka, iyo sidii gacan muuqata uga gaysan lahaayeen qaxootiga ka soo qaxaya Yemen ee soo gaaraya dalka Soomaaliya.

Ugu danbayntii Wasiirka ayaa ka qayb galay 40 sano guuradii ka soo wareegatay markii dalka Muzambiq uu xoriyada ka qaatay gumaystihii boortaqiiska ayaa mar uu ka qayb galay xaflada ka sheegay in dalka Soomaaliya uu gacan weyn ka qaatay sidii Mozambique u heli lahayd xoriyadeeda.

“Soomaaliya waxay door muuqda ka qaadatay halgankii gobonimo doonka dalka Mozambique, waxaana tusaale u ah in wadoodoyinka muhiimka ah ee caasimada ay ugu magacdareen madaxweynihii hore ee Soomaaliya Marxuum Maxamed Siyaad Bare”ayuu yiri Wasiir Farkeeti